

Buugyaraha
haajiraadda

The OMBUDSMAN
Independent Investigations

Halkee ayaad ka heli kartaa warbixin dheeraad ah?

■ Soo wac:

020 7035 2898

■ Warqad u dir:

The Ombudsman
Ashley House
2 Monck Street
London
SW1P 2BQ

■ U soo booqo boggayaga internetka:

www.ppo.gov.uk

Waxaa buugyarahan oo luqado kale ku qoran weliba laga heli karaa boggayaga internetka.

Fadlan nuqullo weydiiso xaruntaada masaafurinta haajiriinta (immigration removal centre) ama soo wac 020 7035 2898.



KALSOONI KU CABO

Sida cabasho loogu dirto

Dhexdhexaadiyaha

Goormeed noo soo caban kartaa?

Cabasho aan rasmi ahayn u diro shaqaalaha haajiraadda

Kuma faraxsanid



Cabasho rasmi ah ku samayso foomka cabashada

Kuma faraxsanid



Annaga noo soo cabo

Marka ugu horraysa, waa in aad isticmaasho nidaamka cabashooyinka ee haajiraadda si aad isugu daydo in aad dhibaataada wax kaga qabato.

- La hadal shaqaalaha jooga xarunta masaafurinta si aad u eegto in ay dhibaataada si aan rasmi ahayn ugu xallin karaan.
- Haddii aanay waxba qaban karin, cabasho rasmi ah samayso oo buuxi foomka cabashada.

Haddii aadan ku faraxsanayn jawaabta lagu siiyo, waad noo soo caban kartaa, laakiinse waa in aad sidaas samayso muddo **hal bil** ah gudaheed ka dib marka aad jawaabta hesho.

Sideed cabasho noogu soo gudbin kartaa?

Buuxi foomka ku lifaaqan buugyarahan ama, haddii aad ka jeceshahay, warqad noo soo dir adigoo faahfaahinaya cabashadaada. Waxaannu marka ugu horraysa u baahan nahay oo keliya faahfaahin gaaban, laakiinse waxaa waxtar leh in aad noo dirto foomkaaga cabashada. Waannu kula soo xiriiri doonnaa haddii aannu macluumaad dheeraad ah u baahanno.

Haddii ay dhibaato kaa haysato akhriska ama qorista, gargaar weydiiso qof saaxiibbo aad tihiin ama qaraabadaa ah ama xubin ka tirsan Guddiga Baarista Madaxbannaan (Independent Monitoring Board).

Kalsooni ku cabo

Yaa caban kara?

Haajiriinta la hayo dhammaantood ayaa xaq u leh in ay noo soo cawdaan.



Maxaad ka caban kartaa?

Waxaad ka caban kartaa wax kastoo la xiriira sida laguula dhaqmo muddada lagu hayo. Hase yeeshee, Dhexdhexaadiyuhu (Ombudsman) wax kama qaban karo cabashooyinka ku saabsan dacwaddaada haajiraadda, xataa wixii go'aan ah ee lagaaga masaafurinayo Ingiriiska.

Maxaa dhici doona **ka dib** marka aad **cabato**?

Waxaannu akhrisan doonnaa cabashadaada waxaanan 10 maalmood gudahood kuugu soo diri doonnaa warqad, aannu kuugu sheegayno in aannu cabashadaada aqbalayno. Haddii aannu cabashadaada aqbali weyno, waxaannu kuu soo sharxi doonnaa taas sababteeda.

Sideen go'aan uga gaarnaa **in** aannu cabashadaada raacsan nahay?

Marka aannu cabashooyinka dhammaantood ka fiirsanayno waxaannu dib u eegnaa daliilka jira waxaanan markaas go'aan ka gaarnaa tallaabada habboon in la qaado. Si kastoo ay natiijada cabashadaadu noqotoba, waxaannu marwalba kuu soo sheegi doonnaa sababaha go'aankayaga dhaliyey.



Maxaa dhici doona marka aannu **baarayno** cabashadaada?

Waxaannu cabashadaada ka soo waraysan doonnaa adiga, Adeegga Haajiraadda iyo ciddii kale aannu u malayno in ay naga caawin karaan. Waxaannu isku dayi doonnaa in aannu cabashadaada ku xallinno mid ka mid ah siyaabaha soo socda:

- Xalka degaaneed – Taas macnaheedu waa raadinta xal aad adiga iyo xarunta masaafurinta isku raaci kartaan. Waxay badi taasi tahay habka ugu dhakhsada badan ee cabashada lagu xallin karo.
- Warbixin ama warqad gaaban – Waxaannu taas adeegsanna marka ay labada dhinac heshiin waayaan. Taasina way dhakhsa badnaan kartaa.
- Warbixin dhammaystiran – Waxaannu sidoo kale taas adeegsanna marka ay labada dhinac heshiin waayaan. Waxay ka sii faahfaahsan tahay warbixinta gaaban wayna ka sii waqti badan tahay marka la qorayo.

Waxaannu baaritaankayaga ku dhammayn doonnaa 12 toddobaad, laakiinse sida ugu badan waqti intaas aad uga yar ayuu qaadan doonnaa. Haddii aannu cabashadaada raacsan nahay, warbixinta waxaa weliba soo raaci doonta talo loo dirayo Adeegga Haajiraadda (Immigration Service) oo ku saabsan tallaabada habboon in ay qaadaan si ay arrimaha qaldamay u saxaan.

The Ombudsman (Dhexdhexaadiyaha)
Ashley House, 2 Monck Street, London SW1P 2BQ
Telefoonka: 020 7035 2898
E-mailka: immigrationcomplaints@ppo.gsi.gov.uk
www.ppo.gov.uk

Fadlan buuxi foomka hoose ka dibna noo soo dir.

Macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed

Magaca qoyska:

Horgalaha (Mr, Mrs, Ms, Miss):

Magaca hore:

Lambarka tixraaca ee dacwadda haajiraadda:

Taariikhda dhalashada: / /

Fadlan sheeg magaca xarunta masaafurinta haajiriinta ee lagugu hayo:

Fadlan sheeg baahiyaha gaarka ah ee nagu habboon in aannu tixgelinno marka aannu ka fiirsanayno cabashadaada ama kula soo xiriirayno.

Cabashadaada

Waa maxay magaca xarunta masaafurinta haajiriinta ee aad ku jirtay markii uu arrinka aad ka cabanaysaa dhacay? Haddii aad galbis ku jirtay, fadlan sheeg goobta aad ka dhaqaaqday iyo goobta aad ku dambaysay.

Miyuu Adeegga Haajiraaddu cabashadaada ka fiirsaday? Haa Maya

Haddii 'Haa' ay tahay, fadlan nuqul nooga soo dir jawaabta aad ka heshay. Haddii aadan weli jawaab ka helin, waxaa laga yaabaa in aanan baari karin cabashadaada.

Haddii ay cabashadaadu ku saabsan hanti luntay ama wax noqotay, fadlan sifayn dhammaystiran ka soo bixi alaabta, soo sheeg goorta aad iibsatay iyo halka aad ka iibsatay, soona dir wixii rasiid ah ee aad ka hayso.

Maxay cabashadaadu ku saabsan tahay? (xaashi kale ku sii wad haddii aad u baahato)

Goorma ayay taasi dhacday? / /

Maxaa kula habboon in la sameeyo si arrimaha qaldamay loo saxo?